





Home Link - Somali



Home Links Xiriirinta Guriga Cutubka 6aad: Waxyaabaha Kora: Todobaadka 3

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan ilmahaagu wuxuu wax ka baran doonaa waxyaabaha kora. Isku day ugu yaraan saddex ka mid ah hawlahan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Wuxuu ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhti yar oo cunugaagu wax ka baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee gudaha sanduuqyada hawlahaa aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: _____

Qorista/Akhrinta

Wada Heesa: Tani waa hees ay tahay in ilmahaagu uu yaqaano.

Mary Had a Little Lamb

Mary had a little lamb
Little lamb, little lamb.
Mary had a little lamb
Its fleece was white as snow.
And everywhere that Mary went
 Mary went, Mary went.
 Everywhere that Mary went
 The lamb was sure to go.

He followed her to school one day
School one day, school one day.
He followed her to school one day
 Which was against the rules.
It made the children laugh and play
 Laugh and play, laugh and play.
It made the children laugh and play
 To see a lamb at school.

Lugada

Qorista Habka Cunto Karinta:

(La xiriira *Community Soup* iyo *The Ugly Vegetables*)

- Ka eeg hababka loo kariyo cuntooyinka buuga ama onlayn: hababka loo kariyo maraqa ee ugu wanaagsan ee loogu talagalay carruurta.
- Ku martiqaad ilmahaaga inuu sameeyo habka cunto karinta ee maraq ama wax kale oo ay doonayaan in ay karsadaan.
- Si wadajir ah u qora liiska maadooyinka iyo talaabooyinka sida loo sameeyo habka cunto karinta.
- Ku martiqaad ilmahaaga inuu sawiro habka cunto karinta.

Bilaabayaasha Wadahadalka:

- Maxaad u maleyneysaa inaad u baahan tahay inaad raacdoo hab cunto karis?
- Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto haddii aadan raacin habka cunto karinta?

Hadal iyo Akhris (20 Daqiiqo)

Bilaawayasha Wadahadalka:

- Maxaad u maleyneysaa in buuggani uu noqon doono?
- Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto marka xigta?
- Waa ayo matalaha aad jeceshahay?

Daahfur

Sameynta Maraq: (La xiriira *The Ugly Vegetables* iyo *Community Soup*)

Ku martqaad ilmahaaga inuu kula sameeyo maraq adinkoo raacaya habka qoyska ee aad jeceshiin ama tan:

Maraqa Khudradda Bocorka

Waxyaabaha ay ka kooban tahay:

- 1 koob oo bocor ah
- 1 baradho macaan
- 1 koob oo khudaar isku qasan (digir, karooto, galley, seleri)
- 6 koob oo khudaar ah
- sinjibii 1 hiinji ah oo la diiray lana duqeeyey
- 1 qori oo qorafal ah
- 2 xabo oo toon ah, la jarjarey
- $\frac{1}{4}$ qaado oo mid kastaaba tahay kamsar, baasil iyo jajabyo qaji ah (isaga tag qajida haddii aad doontid)
- $\frac{1}{2}$ caanaha riyaha ah (waxaad isticmaali kartaa caanaha caadiga ah ama caanoaha qumbaaha)
- milix iyo basbaas (wax yar)

Dhil oo jarjar bocorka, baradhada macaan iyo khudrada isku qasan. Dhamaantood ku rid dheri weyn. Ku dar khudradda, sinjibiisha iyo qorafalka. Karkari digsida oo naaqus dabka Ku dar toonta, kamsarta, baasilka iyo qajida Dab naaqus ah ku kari ilaa 30 daqiqiyo. Ku dar caanaha, milixda iyo basbaaska. Bakhtii dabka oo ka dhex saar qoriga qorafalka. Iisticmaal isku daraha gacanta ama isku daraha caadiga ah si aad ugu rido maraqa. Qeybi maraqa adigoo dulsaaraya basbaas la jarjary iyo kamsar.

Xisaabta

Qaababka Qaybaha Jirka: Ku martqaad ilmahaaga inuu sameeyo qaababka isagoo isticmaalayo qaybo kala duwan oo jidhkaaga ah sida faraha, gacmaha, cududa, lugaha, cagaha iyo jirka oo dhan.

Bilaabayaasha Wadahadalka:

- Sidee ayaan u samayn karnaa goobo innagoo adeegsanayna gacmaheena?
- Sideen u sameyn karnaa saddex xagal annagoo isticmaalayna gacmaheena?
- Sidee baan u sameyn karnaa afargees innagoo adeegsanayna _____?
- Sidee baad ku ogaan kartaa inay tahay _____?
- Maxay yihiin astaamaha _____?

Xusuuso:

- Saddexagal wuxuu leeyahay 3 dhinac oo isku xidhan iyo saddex xagal ama gees.
- Leydigu wuxuu leeyahay 4 dhinac oo toosan oo isku xiran, dhinacyada iska soo horjeedaa waa isku mid, wuxuuna leeyahay 4 xagal ama gees.
- Afargees waa nooc gaar ah oo leydi ah oo leh 4 dhinac oo toosan oo isku xidhan oo dhererkoodu dhamaan isku mid yahay iyo 4 xaglood ama gees.
- Goobo waa si joogto u qaloocda.

Diiwaanka Akhrinta

Calaamadee maalin kasta adiga iyo cunugaaga aad sheeko wada akhrisaan. Buugaagtut waxay noqon karaan Af Ingiriis ama luuqada gurigaaga. Booqo matabadda dadweynaha ee xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan waxyabaha koraya.

Isniin _____ Talaado _____ Arbaco _____ Khamiis _____ Jimco _____ Sabti _____ Axad _____

Buugaga aan ku akhrino dugsiga:

Community Soup
oo ay qoray Alam Fullerton

Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laqa yaabo in aadjeclaataan:

Growing Vegetable Soup oo ay qoray Louis Elhert
Market Day oo ay qoray Louis Elhert

Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Beerta bulshadu** waa dhul ay beeraan koox dad ah oo kamida bulshadu."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Maxay bulshadu ugu tiirsan tahay beerta sidii il cunto?"